**HAB-RAACA DIIWAANGALINTA USDAW**

Xogtan hoos ku qorani waa adeeg loogu talo-galay Ururadda Samafalka ah aan Dawliga Ahayn ee Wadaniga ah (USDAW) si ay u fahmaan waajibaadka uu farayo Xeerka Ururadda Samafalka aan Dawiga Ahayn Wadanga ah. Waxa aad xogtan ka heli kartaa habka loo aasaasayo ururka samafalka aan dawli ahayn ee wadaniga ah, aasaaska dallada, aasaaska ururadda midooba, waajibaadka la farayo ururaddaasi iyo waxyaabaha ka reeban inay ku kacaan. Waxa kale oo aad xogtan ka helaysaa habka loo diiwaan-galiyo, loo cusboonaysiiyo diiwaan-galinta iyo shuruudaha looga baahan yahay diiwaan-galinta, iyo waliba macluumaad kale oo saamayn ku leh waxqabadkooda iyo habdhaqanka looga baahan yahay.

**Aasaaska Urur Samafal Dawli Ahayn Wadani ah (USDAW)**

Urur samafal aan dawli ahayn oo wadani ah waxaa aasaasi kara ugu yaraan shan (5) qof oo muwaadiniin ah ama ajinebi dalka rasmi u degan ah ama muwaadiniin iyo ajinebi intooda badan dalka degan yihiin oo wada jira.

**Waajibaadka**

Ururadda samal aan dawliga ahayn ee wadaniga ah waxaa laga rabaa waajibaad qaanuuni ah oo ay tahay inay ku dhaqmaan. Arrimaha waajibka ah ee laga rabo ururadaas waxaa ka mid ah kuwan hoos ku qoran;

1. In ay ixtiraamaan, aqoonsadaan madaxbanaanida, aayo-katashiga iyo qaranimada JSL, dhaqanka iyo caqiidada ummadda JSL
2. In ay ixtiraamaan, kuna dhaqmaan dastuurka wadanka, xeerarka kale Jamhuuriyada Somaliland, una hogaansamaan siyaasadaha xukuumadeed iyo talooyinka xukuumada ee ku wajahan wax-qabadkooda
3. Barnaamijyada ururadda samafalka aan dawliga aheyn (USDA) ee caalamiga ahi waa inay la jaan-qaadaan qorshaha guud ee horumarineed ee dalka (national development plan).
4. In hantidiisa, kharashkiisa, dakhligiisa uu u adeegsadaa oo keliya ujeedadiisa macaash raadis la'aanta ah ee sharuucda dalka waafaqsan.
5. In dhammaan hawlihiisu noqdaan kuwo lawada-arki karo (transparent) oo dabagal (accountable) leh, waana in uu si caqligal ah u bixiyaa mushaharada/gunnooyinka shaqaalaha, kirooyinka guryaha/gaadiidka iyo kharashaadka maamul iyo wax soo iibsi, si uu u kasbado kalsoonida dadwaynaha.

**Arrimaha ka reeban ururadda aan dawliga ahayn**
**ururadda aan dawliga ahayn, waxaa ka reeban**.

Ururadda samafal ee aan dawliga ahayn waxa la farayaa in ay qadariyaan, ixtiraamaan kuna dhaqmaan sharci wadanka u yaala isla markaana aanay ku kicin ficilo ka hor-imanaaya sharciga wadanka. Waxa gaar ahaan la farayaa ururadda samafal ee aan dawliga ahyn in aanay:

1. Ka qaybgalin hawlaha siyaasadeed iyo ololayaasha doorashooyinka siyaasadeed ee si gaar ah loo gacansiinayo urur ahaan, urur/xisbi siyaasadeed ama musharax/musharaxiin doorasho siyaasadeed.
2. ku Kicin, abaabul, gacansiin qalalaase, iska hor imaad gacan ka hadal leh ama dagaalo iyo ka qaybqaadasho hawlo ciidan ama tababaro ciidan.
3. Keenin, soo dejin, samayn, ka ganacsi hub iyo waxyaabaha qarxa.
4. Ka qaybqaadan, caawin, gacansiin ama dhiirigelin argagixiso iyo falal Argagixiso
5. Ku hawlanaan ama caawin soo saaris, beerasho, safayn, dhoofin, soo dejin, kaydin, ka ganacsi, haysasho, isticmaal ama qaybin maandooriye.
6. U isticmaal dhaqaalaha iyo hantida ururka, wax kasta oo lid ku ah danaha qaranka, ciqiidada diimeed, anshaxa bulshada, caafimaadka, xasiloonida qaranka ama wax kasta oo ku wajahan qabyaalad iyo takoor.
7. Dhaqaalaha iyo hantida ururka u adeegsan hawlo ganacsi.
8. ku kicin fal kasta oo kale oo ay reebeen shuruucda JSL.

**Ogsoonow:***Urur kasta oo samafal aan dawli ahayn oo waddani ah waxa qaanuun ahaan laga rabaa inuu iska diiwaan-geliyo Waaxda Isu-duwida Kaalmooyinka ee Wasaarada Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka*

**Shuruudaha Diiwaan-gelinta**

Si loo diiwaan-galiyo urur samafal aan dawli ahayn oo wadani ah waxa laga rabaa in uu buuxiyo Codsiga Diiwaan-galinta USDAW ***Form A1*** oo ku qoran Afsomali ama English kolba kaad doorbidayso. Codsiga Diiwaan-galinta ***FormA1*** waxaad ka heli kartaa Waaxda Isu-duwida Kaalmooyinka ee Wasaarada Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka.
Waxa lagama maarmaan ah in magaca ururka ee aad qaadanaysaa yahay mid ururka u gaar ah sidaa darteed waa in la hubsado in magaca Ururku qaadanayaa aanu ahay magac jira oo urur hore ama shirkad hore leedahay. Si aad arintaa u hubsato waxa aad la soo xidhiidhaysaa Waaxda Isu-duwida ee Wasaarada Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka, adigoo u sheegaya magaca aad u dooratay ururka, waydiinayana in laguu hubsado in magacaasi la qaadan karo.

Si loo diiwaan-galiyo ururka waxa laga rabaa in Ururku dhamaystiro shuruudaha hoos ku qoran:

1. Waa in uu leeyahay xafiis shaqeeya iyo cinwaan sugan, magac u gaar ah iyo Astaan u gaar ah.
2. Waa in uu leeyahay xeer-hoosaad uu garyaqaan soo ansixiyay oo dhammaan

xubnaha aasaasay ay saxeexan.

3. Waa in uu leeyahay qaab-dhismeed awoodahiisu kala qeexan yihiin.
4. Waa in xubnihiisu aqoon iyo waaya'aragnimo u leeyihiin wadaagaha/wadaagyada (Sector/s) uu ka shaqaynayo.
5. Waa in hadafkiisa, ujeedadiisa iyo hawlaha uu rabo in uu ka shaqeeyo ay waafaqsan yihiin xeerarka dalka.
6. Waa in uu diiwaan-geliyaha u soo qortaa codsi ay ku qeexan tahay:

a) *Magaca ururka, xarfaha loo soo gaabiyo (markay jiraan), xarunta iyo laamaha ururka (markay laamo jiraan), ciwaanka ururka oo ay ku jiraan telefoono iyo sanduuqa internetka*
*b) Magacyada xubnaha aasaasayaasha ururka.*
*c) Ujeedada ururka iyo wadaaga/wadaagyada uu ka shaqaynayo*
*d) Degaanada uu ka hawlgelayo*
*e) Xubnaha guddiga hogaaminta iyo xubnaha maamulka*

8. Codsiga diiwaan-gelinta waa in ay ku saxeexan yihiin xubnaha asaasayaasha ama cid ay awood u siiyeen
9. Codsiga diiwaan-gelinta lagu dalbanayo waa in ay weheliyaan:
   *a)* Nuqul ka mid ah dastuurka ururka kaasi oo qeexaya:
      *1. Magaca rasmiga ah ee ururka oo aan hore loogu diiwaan-gelin urur hore oo aan dawli ahayn, shirkad ama cid kale.*
      *2. Hadafka, ujeedada iyo hawlaha ururka*
      *3. Tirada xubnaha aasaasayaasha, haddii lagu biiri karo hab-raaca loogu biiri karo iyo habka la isaga saari karo.*
      *4. Hab-raaca doorashada golaha/guddiga hogaaminta iyo luminta xubinimada golaha/guddiga hogaaminta.*
      *5. Sida shirarka loo qabanayo*
      *6. Awoodaha iyo masuuliyadaha shirwaynaha (marka uu jiro) iyo golaha/guddiga hogaaminta.*
      *7. Habka Doorashada, xulashada ama magacaabista maamulka ururka iyo awoodaha maamulka*
   b) Faahfaahin kooban oo khuseysa magacyada iyo saxeexyada xubnaha asaasayaasha;
   c) Taariikh-nololeedka aasaaseyaasha (CV) iyo sawiradooda iyo caddayn dembi-la'aneed;
   d) Rasiidhka bixinta cashuurta diiwaan-gelinta

***Ogsoonow:***
*Lama diiwaan-galinayo ururka aan dhamaystirin shuruudaha kor ku xusan ama macluumaadka uu soo gudbiyay ayna ku salaysnayn xaqiiqada. Ururka codsada diiwaan-galin ee la diido codsigiisa si waafaqsan xeerka, dib uma soo codsan karo diiwaan-galin mudo sanad gudihii ah.*

**Cusboonaysiinta Ruqsada Diiwaan-galinta**

Ururka samafal aan dawliga ahayn ee la diiwaangaliyo waxa la siinaya shahaado cadynaysa in ururkaasi si sharciga waafaqsan uga diiwaan-gashan yahay Wasaarad Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka. Shahaadada waxa ku qeexan magaca ururka oo dhamaystiran, lambarka diiwaanka (registration number), lambarka taxanaha ( serial number), taariikhda diiwaan-galinta, iyo taariikhda ay shahaadada diiwaangalintu dhacayso. Marwalba oo ay shahaadada diiwaangalintu dhacdo, waxa qanuun ahaan laga rabaa ururka in ay cusboonaysiiyaan. Cusboonaysiinta Ruqsada diiwaangalinta waxa la isticmaalayaa ***formka A2*** **-**Codsiga Cusboonaysiinta Ruqsada Diiwaan-galinata-, oo aad ka heli karto Waaaxda Isu-duwida kaalmooyinka ee Wasaarada Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka.

Marka aad cusboonaysiinayo ruqsada diiwaagalinta ururka smafal ee aan dawliga ahyan ee wadaniga ah waxaa lagaa rabaa in aad sheegto isla markaana aad cadayso – si loo cusboonaysiiyo xogta laga hayo ururka- waxkasta oo iska badalay xogta ururka sida magaca ururka, cinwaanka, xubnaha guddida, xeer-hoosaadka, sanduuqa xisaabta (account), iyo baaxada hawgalka ururka xaga wadaagaha iyo xaga juquraafiyadaba.

Waxa kale oo laga rabaa ururku in soo gudbiyo waxqabad-sanadeedkii ururka ee sanadka dhamaaday oo tafatiran muujinayana waxqabadkii fulay iyo maaliyadii loo isticmaalay waxqabadkaasi (Detailed Budget) iyo qorshaha ururka ee sanadka soo socda iyadoo la isticmaalayso ***Form10*** Warbix-Sanadeedka (Reporting Format) ay diyaarisay Wasaarada Qorshaynta iyo Horumarinata Qaranku oo ku qoran Afsoomaali iyo English kolba ka aad doorbido.

**Heerarka Diiwaan-galinta**

Marka urur samafal aan dawli ahayn oo wadani ahi uu doonayo in uu ka hawl-galo degmo gaar ah, codsiga diiwaan-gelinta waxaa uu u gudbin doonaa diiwan-galiyaha degmada. Hadii uu ururku ka hawl-galayo gobol dhammaantii, codsigiisa diiwaan-gelineed waxa uu u gudbin dooona diiwaan-geliyaha gobolka.

Ururka samafal aan dawliga ahayn ee waddaniga ah ee baaxadda hawl-galkiisu daboolayso ugu yaraan laba gobol iyo ururka aan dawliga ahayn ee caalamiga ah ama shisheeye ah waxa ay iska diiwaan-gelinayaan Diiwaan-geliyaha Guud ee Gobalka Maroodi-jeex.

Ururka diiwaan-geliye degmo u gudbista codsi diiwaan-gelineed ee laga aqbali waayo, waxa keliya ee uu cabashadiisa u gudbin karaa diiwaangeliyaha gobolka oo go’aan kama-dambeys ah ka qaadan kara.

**Aasaaska Dalladaha iyo Bah-wadaagta**

Dalad ama bah-wadaag ururo samafal aan dawli ahayn oo wadani ah waxaa aasaasi kara ugu yaraan 15 urur oo wadani ah oo *diiwaan-gashan oo shaqeeya, kuwaas oo kawada shaqeeya hal wadaage (sector) ama u adeega koox bulsho oo gaar ah, sida haweenka, naafada, dhalinyarada, dadka laga tirada badan yahay iwm. ama uu jiro hadaf guud oo mideeya ama aag juquraafiyadeed oo ay kawa hawlgalaan*

- Dalad ama dan-wadaag waxaa loo abuuri karaa ujeedo ah: a) Kobcinta iyo dhismaha kartiyeed ee ururadda ku bahoobay; b) Isu-duwida, qiimaynta, kormeerka iyo tayaynta hawlaha iyo barnaamijyada ay ururaddaasi fuliyaan; c) Difaacida iyo u ololaynta ururaddaa ku bahoobay dallada ama bahwadaagta; d) Xalinta khilaafyada bahoobayaasha dhexdooda iyo khilaafka xubnaha dallada ama bah-wadaagta iyo hay'adaha la shaqeeya; e) Fududaynta wada shaqaynta, iskaashiga iyo xidhiidhka xubnaha dallada ama bah-wadaagta

- Waa in xubnaha ku bahoobaya dallada ama dan-wadaagta ay qabsadaan shirwayne dhamaan ururadda ku bahoobay dalladuna ay ergo u soo dirtaan uga qaybgasha shirweynaha

- Shirwaynaha aasaaska dallad ama bah-wadaag wax uu qaanuun ahaan suuragal noqonayaa marka : a) ergooyinka ka soo qabgelaya shirwaynuha ay sitaan kalsooni qoraal ah oo ka timid ururadda ay metelayaan ; b) marka ay goob-joog yihiin ergo ka socota Wasaarada Qorshaynta oo goobjoogenimo( Observers) kaga qaybgelaya shirwaynaha iyo ergo ka socota guddiga USDA; c) marka ay jirto ujeedo cad oo xeer-hoosaadka dallada ku qeexan oo loo midoobayo, taas oo waafaqsan tilmaamaha - a,b, c, d, iyo e, - kor ku xusan; d) marka sida la iskugu dooranayo jagooyinka iyo xilalka dallada ay tahay si dimoquraadi ah oo muuqata (transparent); e) marka jagooyinka iyo xilalka la isugu dooranayo urur ahaan ee aan la isgu dooranayn shakhsiyaad

**Diiwaangelinta dalladaha USDAW**

Hab-raaca diiwaangelinta ee dalladaha iyo bah-wadaagta ururadda samafal aan dawliga ahayn ee wadaniga ah waxaa loo raacayaa tilmaamaha kor ku xusan ee loo raacayo diiwaangalinta Ururadda aan dallada ahayn. Macluumaadka dheeraadka ah ee laga rabo ururadda dallada waxa muujinaya Codisiga Diiwaan-galintaDallada (Form A3) oo aad ka heli kartid Waaxda Isu-duwida Kaalmooyinka ee Wasaarad Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka.

**Isku Biirid ama midawga laba ama in ka badan oo USDAW ah**

Laba urur samafal aan dawli ahayn oo wadani ah ama in ka badan oo diiwaangashan way isku tagi karaan ama way midoobi karaan; Ururka cusub ee ka dhashay midawga waxa laga rabaa in la diiwaangelinayo, ka dib marka diiwaangeliyuhu, isagoo la tashanaya guddiga (USDA) hubiyo in midawga cusub qaab sharciga waafaqsan loo

sameeyay, isla markaana diiwaan-gelintii ururadii hore ee midawgu saameeyay ayaa laga saarayaa diiwaanka

**Ka Saarida Diiwaanka/Baabi'inta Shahaadada**

Marka diiwaan-geliyuhu uu ku qanco inuu baaba'ay jiritaanka urur diiwaan-gashanaa, wuxuu soo saari doonaa ogeysiin qoraal ah oo lagu baahin doono faafinta rasmiga ah sida telifishanka qaranka, raadiyowga, iyo joornaalada ama warbaahinta dalka. Hadii ururkaasi ku guul darraysto in uu la soo xidhiidho diiwaan-galiyaha ama u soo gudbin waayo diiwaan-geliyaha guud caddeynta jiritaankiisa muddo soddon cisho (30) gudahood ah, diiwaan-geliyuhu waxa uu baaba'in doonaa shahaadadda diiwaan-gelinta ee ururkaasi, isla markaana magaca ururka ayuu ka saari doonaa diiwaanka.

**Masuuliyada Xisaabtanka iyo Nidaam Hoosaadka Ururradda aan Dawliga Ahayn**

Urur kasta oo aan dawli ahayn oo wadani ah, waxa laga rabaa warbixin sanadeed ku saabsan wax-qabadkiisii sanadkii dhamaaday oo faah-faahsan, iyadoo la raacayo qaab-tilmaame war-bixineed (reporting format) oo laga heli karo Wasaarada Qorshaynta iyo Hurumarinta Qaranka. Ururadda aan dawliga ahayn ee waddaniga ah ee si toos ah uga hela kaalmo dhaqaale deeq-bixiyeyaasha, waxay ku muujin doonaan kaalmadaas ay helaan iyo wixii lagu fuliyey war-bixin-sannadeedkooda ay soo gudbinayaan. Waxa kale oo laga rabaa xogta qorshaha waxqabadkooda sanadka soosocda. Ururaddu waxay ka dalbanayaan Waaxda Isu-duwoda Kaalmooyinka ee WQHQ formka Warbixin-sanadeedka ***Form10*** kaasi oo ay ku buuxinayaan macluumaadka looga baahan yahay

**Dokumentiyada Isku-maamulka iyo Ogeysiinta Bedelaadda Dastuurka Ururadda aan Dawliga ahayn**

Dastuurka iyo dokumantiyada kale ee xubnaha asaaseyaashu ay u gudbiyeen diiwaan-geliyaha wakhtigii la samaynayay codsiyada diiwaangelinta ama kuwo ka danbeeyay dastuurka iyo dokumantiyada loo gudbiyay diiwaan-galiayaha *waxay noqon doonaan dokumantiyada lagu salayn doono xukunka ama go'aan-qaadashada lagu kala saarayo* haddii muran yimaaddo. Ma jiri doono Urur aan Dawli ahayn oo hawl-geli doona ama fulin doona hawlahooda si ka hor imanaysa dokumantiyadooda ay u soo gudbiyeen diiwaan-geliyaha.

Is bedal kasta oo dastuurka lagu sameeyo oo ah beddelaad saameyn ku leh ujeedooyinkii hore ee ururka ama magac, ama magacyo masuuliyiin xafiis, waxa lagu war-gelin doonaa diiwaan-geliyaha si qoraal ah.

Ogeysiinta la siiyo diiwaan-geliyaha waxa wehelin doona: a) Nuqulka go'aanka la gaadhay oo ay saxeexaan mas'uuliinta awoodda u leh sida ku cad dastuurkooda; b)Nuqulka Shahaadadda diiwaan-gelinta haddii qodobada dastuurka Ururka ee la beddelay ay saameyn ku leeyihiin ujeedooyinka hore ee Ururka.

Diiwaan-geliyuhu ka dib marka uu helo ogeysiinta waxa uu: a) Gelinayaa diiwaanka dhammaan waxyaabaha la beddelay sida lagu soo gudbiyay ogeysiiska; b) Bixin doonaa Shahaado cusub oo diiwaan-gelineed – markii loo baahan yahay; c) Ka saarayaa diiwaanka wixii isbeddel lagu sameeyey.

Sidaa darteed waxaa muhiim iyo maslaxad uh ururadda samafal ee aan dawliga ahayn ee wadaniga ah sharci ahaana laga rabaa in ay soo sheegaan waxkasta oo iska badala xogta ururka iyo xeerhoosaadka ururkaba iyakoo isticmaalaya ***Form A7*** Isbadal Ogaysiinta kaasi oo laga heli karo Waaxada Isu-duwida Kaalmooyinka ee WQHQ.

**Hawl-galka ururadda**

Ururka aan dawliga ahayn ee u diiwaan-gashan si waafaqsan sharcigan waxa uu xaq u leeyahay in uu bilaabo wax-qabadkiisa kuwaasoo ay ka mid yihiin dhaqdhaqaaq mashaarciyeed oo waxtar u leh bulshada iyo sameynta ilo wax-soo saar ku jiheysan joogteynta wax-qabadka Ururka iyo barnaamijyada loo fulinaayo bulshada isla markaana waafaqsan shuruucda dalka.

**Sanduuqa Maaliyadeed ee USADW**

Waxaa la sameyn doonaa sanduuq-maaliyadeed oo ay leeyihiin ururadda aan Dawliga ahayn ee Waddaniga ah. Sanduuqaas waxa iska kaashan doona xukuumadda, Deeq-bixiyeyaasha, hantiilayaasha gaarka ah (private sector) iyo ururadda aan dawliga ahayn. Sanduuqaasu waxa uu wax ka tari doonaa tababarka, kor-u-qaadidda tayada ururadda samafal aan dawliga ahayn ee wadaniga ah iyo mugga wax-qabadkooda.

Xog dheeraad aha waxa aad ka heli kartaa Wasaarada Qorshaynta iyo Hurumarinta Qaranka, Waaxda Isu-duwida Hawlaha Ururada:

Tell: +2522-400-3460 Email: sjamauk@yahoo.co.uk
Website:www.slministryofplanning.org